**Bayaan Wadajir**

**ay u soo wada saareen**

**Dawladda Federaalka KMG Soomaaliyeed**

**Iyo**

**Isbahaysiga Dib U Xoreynta Soomaaliyeed**

AAW

Iyadoo la raacaayo Qodobka 9aad ee Heshiiskii Jabuuti, Dawladda Fedraalka KMG Soomaaliyeed iyo Isbahaysiga Dib U Xoreynta Soomaaliyeed waxay mar labaad xaqiijiyeen sida ay uga go'antahay inay dib u heshiisiin iyo iskaashi siyaasadeedba ay sameeyaan.

Sidaas darteed, labada dhinac waxay uga mahad celiyeen Umadda Soomaaliyeed taageerida ay ka heleen, waxayna ka codsanayaan in ay ku dheganaadaan wadada lagu gaaraayo xal waara ee nabadeed.

Labada dhinac, waxay uga mahad celiyeen bulshada caalamka taageerida joogtada ah iyo kaalmada wax ku oolka ah ee ay u fidinayaan Heshiiska Jibuuti.

Labada dhinac, waxay soo dhoweynayaan kaalmada bulshada caalamka iyo hoggaaminta Qaramadda Midoobay kuna aadan bilowga dhismo Dawlad lagu midaysan yahay.

Dowladdaas oo u furan dhammaan muwaadhaniinta Soomaaliyeed, kuna dhisan wax wada qabsi iyo is ixtiraam, lehna Barlamaan loo dhan yahay, mudnaanta koowaadna siindoonta iskaashiga siyaasadeed, mas'uuliyad wadaag iyo xaqiijinta nabad geliyada.

Dawladda Federaalka KMG.

Isbahaysiga Dib U Xoreynta Somaaliya

Jabuuti, 26 Oktoobar 2008